GODOB JACEYL



Ooraa:Feysal Maxamed Cabdiraxmaa

GODOB JACEYL

Qof walbo oo dunidaan ku nool waxa uu wajahaa dhibaatooyin kala duwan iyo dacadiyo badan oo kaga imaanaayo meelo kalo duwan iyo dadyoo kala duwan.

Mararka qaar waxaa jiro dad aadan ka fileynin in ay ku wax yeleynayaan ama dhibaato kuu geysanaayo.

Bisayl iyo xiiso raagay qofkii baday soowma baahana, bukaan kal gaceyl bastii ah cidii baday sow uma bahno

Akhyaar kala baadiyowda bariidada sow ma doonto bartuu ka gacayl fadhiistay haduu boholyow ku raago jaceylkaaga hantiya horjoogaagaa farxad ah.

Jaceylka waa mid ka mid ah dhibaatooyinka qofka nafsadiisa sameyn wanagsan ama mid xun keyeesho inta badan.

Sabiriin waa gabar ka mid ah gabdhaha ku nool magaalada Muqdisho waxna ka barato mid kamid ah jamacadaha dalka waxa ayna la nooshahay qoyskeeda oo ka koban wiilal iyo gabdho nolosho qoyskoodu waa mid wanagsan dhaqaalo ahaan, balse Saabiriin waxa ay qabishay mid kamid xiliyadeeda ugu adgaa nolasha. Ma jiro qof ogaan garo halka uu jaceylka uga imaanayo ama ka soo wajahaayo Sabiriina waxa ay ka mid tahay dadkaas.

Sabiriin waxa ay aheed gabar aan ku wanagsaneen la haasawida wiilasha iyada oo inta badan iska ilaalin jirtay xilika ay Dugsiga sare dhigan jirtay balse iyada oo sidaas aheyd ayaa mar un waxaa isbadalay sida uu fikirkeeda ahaa.

Inta badan Sabiriin markii laga daayo iskuulka waxa is raaci jireyn gabar saaxibteed ah oo lagu magacaabo ***Sahro*** *oo ay isku xafad ahaayeen.*

Malin maalmaha ka mid ah ayaa Saabiriin saaxibteedi ayaa waxey ku mashqyshay arin iskulka dhaxdiisa halka ay Saabiriin aheyd mid aan ka war qabin arintaas waayo fasalka waxa ay ka soo baxday xili hore. Balse markii ay xiisadaha

dhamaadeyn iskulkuna la soo dayay Sabiriin waxa ay soo istagtay bananka iskuulka oo ay ku sugeysi saxiibteed balse markii cabaar tagneed ayee waxa ay bilowday in ay laxiriirto balse talefankeeda waxa uu ahaa lacag la'aan iyado oo garan la waxa ay sameyso ayaa waxaa argay mid kamid ah ardaydii iskuulka dhiganaaye oo isna mesha ku sugaye qof kale ayaa dareemay in ay xalad adag heysto ayaa wiilkii waxa uu bilabay inuu la hadlo.

Wilkii "Walal ma kugu cawin karaa talefankeyga si aad u wacaati qofkaa sugeysi"

Sabiriin "Maya waa mahadsantahay wll"

Wilkii "Waxba ha iga xushoon walal waxan ahay walalkaa oo kale"

Sabiriin "Iyada oo xishooneysa ayee tiri haye ii dhiib".

Wilkii "Hoo".

Sabiriin waxa ay bilaabday in ay la hadasho saaxibteed, markii talefanka laga qabtay waxaa dhaxmertay sheekadaan.

Sabiriin "Sahro waa Sabiriin ay ku away irida ayaa daganahee"

Sahro "Sabiriin waxa ku jiraa xafiiska waxaa soo xalin rabaa aarin yar"

Sabiriin "Wax dhib ah maa jiro saxibee"

Sahro "Xogaa waxaa saage isqabsaday walalkee iyo mid ka mid Macalimiintiisa (BARAYAASHIISA) arintaas ayaa soo

xalin rabaa ay iska sii bax saaxibey manta".

Sabiriin intaas ka dib waxa ay talefanka u celisay wiilkii iyada oo ku dhaday

" MAHADSANID WALAAL".

Wilkii ayaa ugu jawabay "Adaa Mudan walal, balse waxaa tahay qof wanagsan oo daacad ah waayo intaas ayaa saxibtaa sugeysi waxaa tahay shaqsi u qalmo saaxibtinimada".

Wilkii inta uu niyadiisa is kala hadlay ayuu yiri "Malaha manta nasiibka ayaa ku daahiyay oo qoftaan kutusaayay amaa ku qabsadaa gabadhaan ileyn waa miskiin daacad ah."

Intaas ka dib wilkii iyo Sabiriin waxa ay u wada dhaqaaqeyn bosteejada gawaarida laga raaco inkastoo laba degmo u kala socdeen ayaa intii ay wadada bosteejada loo sii socday wilkii ka codsaday inuu numberkeeda siiso.

Sabiriin iyada oo firineyso asxankii uu u sameyay waxa ay siisay numberkeeda talefanka.

Halkasna waxaa ka bilowday safar cusub oo ay Sabiriin waligeed galin.

Tolow Sabiriin safarkaas in ay bilowdo ma aqbali dontaa.

Wajiga wiilka uu tusay Sabiriin iyo niyadiisa waxa ku jiro ma isla jaan qaadi karaan.

Markii tobbon saac laga jogay wada hadlkii dhexmaray Sabiriin iyo wiilkii ayaa sacadu markee ahey 10:00 PM habenkii Sabiriin ay isku diyarineysay in ay seexato iyada oo jogto qolkeeda jiifka sarana sariirteed hurdada raadineyso ayaa mar un soo dhacay talefankeeda kaas oo agteeda yaalay, durbo markii ay qabatay talefanka waxaa dhagaheeda ku dhacay cod wiil kaas oo hadalkiisa ku biloway:

Wilkii "Asalaamu caleykum waa miskiinkii manta".

Sabiriin "Wacaleykumu salaam walaal".

Wilkii "Sideetahay walal".

Sabiriin "ALXAMDULILAAH WALAL adi sidee tahay".

Wilkii "Magaceygu waa Hanad dhigto iskulka aad dhigato fasalka 11aad ay dugsiga sare waxan rabaa in aan ka mid noqdo asxabtaada qaska ah ay sidee u aragtaa walaal".

Sabiriin ayaa markii inta ay shakisay fudedka wiilka manta argay durbo saxibtinimo codsanaayo amuu wax kale damac sanyahy ayee niyada is kala hadashay".

Sabiriin ayaa wilkii ugu jawabtay "Walal waa xilika hurdada ay bari ayaa jawaab ku soo siinaa oo aan ka soo fikiraa saxibtinimadaada."

Hanad ayaa ku yiri " IN SHA ALLAH ".

Labo maalin ka dib Sabiriin ayaa wilkii wacday una shegtay jawabtii uu ka sugaye.

Sabiriin ma aqbashay saxibtinimada Hanad mise wey iska diday.

Maxaa u qorshesnaa Hanad jawabta ka dib.

Sabiriin markiiba waxa ay bilowday in ay wacdo talefankisa Wicitaan ka dib waxaa dhaxmertay sheekadaan:

Sabiriin "Iska waran miskinkii yaraa"

Hanad "Wan ficanahay saxibtii sharafta badnedee"

Sabiriin "Mudo dheer ka dib aan kaa maqnaa waxaa taxliilin iyo falanqeyn ku hayay sidii aan jawab kuu siin la haa"

Hanad "Anba intaas waxaa sugayay natiijada soo baxeyso ee hada maxaa go'ansatay oo aad ii soo gudbineysaa"

Sabiriin "Ugu danbeyntii waxaa ii soo baxey hal jawaab taas oo aad ku murugoneysi ama aad ku farxeysi ee diyaar u noqo kuna qanac jawabta wax suaal kale ha iga weydiin jawabtaas sawabta aan ku qatay"

Hanad "Diyaar ayaan u ahay wax walbo oo aad soo go'ansato ee soo daa"

Sabiriin "Kalsonidada ma xumo balse ani waxaa go'ansaday in aan aqbalo saxibtinimadada ugu danbeyntii"

Hanad "Mar walbo waxaa ahaa mid jaceyl saxibtinimadada waxana rajeynaa in aan midka kugu dhaw ahaado dadka kale".

Sidii ayeyna habenka ku kale tageyn.

Hanad iyo Sabiriin waxa ay ahaayeen labo qof oo saxibtinimada isku qadarin jiray waloo ay Sabiriin aheyd mida si gaar ah u qadarin jirtay saxibtinimada.

Sabiriin waxa ay aheyd gabar fur furan oo wilasha ay jacelyahiin sheekadeda ixtiramka badan halka Hanad ahaa mid ka

maseri jiray markii ay wiilasha kale oo ay isku fasalka yihiin Sabiriin.

Malin malmaha ka mid ah ayaa waxaa dhacday Sabiriin oo fasalka ku qadaneyso bareega oo la joogo will ka kamid ah wiilasha ay isku fasalka yihiin ayaa waxaa argay Hanad oo soo socdo.

Iska oo aan waxba hubsan ayuu Sabiriin u wacay oo ku yiri "Muxuu ahaa wilka kula fadhiyo oo aad la shekeysaneso marar bandana ayaa argay iska oo kula fadhiyo ay wax miyaa idinka dhaxeyo"

Sabiriin ‘‘inta ay qososhay (Hhhhhh) ayee ku tiri iyadoo oo meel dhaw ka tusisay suasha wuu weydiyay jawabteed oo ay ku tiro ***anii adi ma waxbaa inaga***

***dhaxeyo**.waxeyna u sii racisay waad ka hinastay (Maseyrtay) ayaa filaa.*

Hanad ayaa ku dhahay " Waxaa u maleynaa inaa u dhinto maseyr dartiis ee caawa ayaa inoo balan ah.

Sidii ayena ku kala tageyn oo ay fasaladooda kala adeyn.

Mudo gooban ka dib ayaa waxaa isbadalay wax walbo ka dib markii Hanad la imaday fikir kale oo ka duwan midka ay hada kuwada socdaan oo waxoo u soo bandhiga kana codsaday in ay xirirkooda saxibtinimo u badalaan mid JACEYL. Isaga oo u soo qoray fariin ka turjumeyso sida uu jaceylka ugu qaday

Inta quman baad u qalisantoo adaa qandaraas ku qatay bogoo

Wadnaha qufashoo furaha qarsaday

Adaa qudh qudhsiiyay qishaadka xubigoo fiid qudha u jira qofnimo u dhashee

Hadmaad ila qori qisooyin jacayl.

Sabiriin markii ay farinta aragtay waaga ayaa ku baryay weyna ka caga jiitay codsigaas iyada oo ka cabsaneyso in uu jaceylka dhibaato u geysto.

Dadaal badan iyo imtaxaan badan ka dib wey ka aqbashay xirirkaas.

Xilikaasna waxa ay aheyd fasalka ugu danbeyo Dugsiga sare.

Sabiriin wax dhib ah kalama kulmin mudada ay saxiibada ahaayeen sidaas ayee uga aqbashay xiriirka ka jaceylka.

Sabiriin iyo Hanad waxa ay bilabeyn nolol cusub oo jaceyl ah iyadana waxa ay aheyd markii ugu horeysay ay jaceyl sameysay.

Muxuu ka badalay nolosha Sabiriin jaceylka ay sameysay.

Markii ay mudo bil ah xiriirkooda jaceylka ah socday Sabiriin ayaa darentay dareen caashaq ah oo saaid ah.

Waxa ayna is dhafsan jireyn erayo midba midka kale.

Sabiriin ayaa iyadoo cabireyso sida uu badalay jaceylka dhinaceyda waxa ay goor galab ah u dirtay farintaan.

Jirka muu dubaxsheen

Nafta oon ku jirino

Cirku jabaq ma keeneen

Hadey jirin daruurtuye

Ifka lamaaba jogeen

Dhulka oon la jiifine

Hanadoo jacaylkuna

Waxaana jirin haduu yahay

Jaleecdaan ku eegaba

Jiro ima haleesheen

Mana jirirocoodeen

Intaa jaah wareeree.

Miyaa xalaytoo jiifsaday

Jirjirkaba miyaan dhiagay

Riyaad igula joogtee

Micidii dhul jiiftiyo

Jilib qodaxliyoo halis ah

Hadaa guuro jiidhee

Jiic iyo cadaadee

Jiir waad ku xirantaa

Jiirin uu ku yaalee

Jidiin wuxuu cadaadaa

Ama oo ku jabiyaa

Markaad jeex abaariyo

Jid cidla ah lugeysee

Jabka kaa ka sii daran

Hayaay waa jaceylkee

Miyaan xalaytoo jiifsaday jirjirkaba miyaan dhigay harkaaga ila joogee.

Hanad markuu farinta akhristay dhankiisa saaid ayuu sii noqday waliba jaceyl dheraad ah ayuu u sii muujiyay.

Inta badan waxa ay ahaayen kuwa waqtikooda wada qataan xiliyada bareeka iyo xiliyada habenkii ah iyaga oo mararka qaar waqti ku qadan jireyn meelaha ay dadka iskugu imadaan oo magaalada ku yaalo.

Markii ay jaceylkooda meel fiican marayo sanad dugsiyeedkana dhamaday sidaasna ay Sabiriin ku dhameysay dugsiga sare kuna bastay imtaxnkaa iskuulka iyo midka dowlada.

Maxaa dhacay intaas ka dib.

Sameyn noocee ayuu ku yeshay jaceylkooda fasaxa sanad dugsiyeed iyo qalan badalashaday ay ka badalatay

dugsiga sare madaamo oo Hanad laba sano ka danbeeyo.

Fasaxa intiisa badan waxa ay ku qaateen si wanagsan midba midka kaleoo isoo xiriirinaayo weyna iska war qabeyn xaladahooda cidladana waa ay iska wa heshanaayeen.

Hadii guriga tiirararka uu ku dhisan yahay dumo ama ay daciifaan oo md kamid ah waxaa hubaal ah in mudo goban ka dib uu dumaayo gurigaas ,si lamid ah hadii ay Kalsoonida jaceylka dhunto ama shaki ku yimado jaceylkaas wuxuu ahanayaa mid u muuqdo sida qorax sii dhaceyso.

Malin maalmaha ka mid ah ayaa Sabiriin wiil ay ilmo habreed yihiin oo marti ku ah gurigooda ka codsaday in ay u raacdo goobaha ay dadka iskugu imadaan gaar ahaan Beerta nabada, weyna ka aqbashay codsika walalkeed.

Balse waxaa ka dhacay meesha arin yaab laheyd oo Sabiriin wal-wal iyo cabsi ku bertay.

Intii ay Sabiriin ku guda jirtay dalxiiska ay isku soo raceyn oo wilka walalkeed ayee waxa ay faristeen goob ka mid ah gobaha ay dadka faristaan.

Balse waxaa si kadis ah meesha ku joogay Hanad iyo asxaabtiisa oo ku sugnaa halkaas, balse Hanad ayaa indhahiisa si

kadis ah ku qabteen Saabiriin iyo wiil oo wada fadhiyo meel gaar ah oo ay qosolkooda baxaayo aanba ka qasneen bashalkooda.

Hanad ayaa waxa ka soo haray indho taag iyo yaab afka inta uu gacanta sartay in mudo ahna sheekadooda ka daawanaaye meel ka fog xoogaa balse ugu danbeyntii ayuu wuxuu qatay go'aan layaab leh.

Kadib markii uu talaabo u soo qaday halkii ay wada fadhiyeen Sabiriin iyo wiilka.

Maxaa dhacey intaas kadib.

Hanad inta uu dusha sare ka soo istagay ayuu ku yiri.

“Barasho wanagsan seydi”

Sabiriin inta ay yabtay ayee ku tiri Hanad adi iyo inta sidee wax u jiraan waa maxay waxa aad ku hadleyso ma kaftameysaa mise dhab ayee kaa tahay.”

Hanad “waxaan ahay qof fiyoo oo miir leh balse waxaa ku qaldanaa markaa adoo kale jaceyl la sameynaaye oo laba wajiilaha ah ay nabadee”.

Sabiriin walalkeed inta uu yabay ayuu ku yiri “Sidee wax kaa yihiin wayo ani waxaan ahay walalkeed ay is daji oo sida wanagsana u fikir”

Hanad “Inta uu qoslay (Hhhh) ayuu yiri “Sidee anoo wax walbo indhaheyga ay marqati ka yihiin miyaan iska daboolaa oo

aan iska xiraa waan aqanaa sida ay u wada shekeystaan laba isla dhalatay aniba gabar wey ila dhalatay balse sida u wada shekeysaneysiin anii iyada xitaa waligeyn uma shekeysan ay nabadee”

Sabiriin inta ay ka soo daba baxday ayee ku tiri “Hanad macaane isdaji si qaladna waxa ha u fahmin ay waa walalkee magaalda Safar ku ah ay axdikeena iyo balanteena fudeed ha ku burinin.”

Hanad “Isii daa oo orod Isaka saxiib ha kuu noqdo”..

Sidaas ayeena dhabarka isku xijiyeen Hanad oo xanaaqsan iyo Saabiriin oo murugo u soo hoyatay.

Xirirkoodii halkaas miyuu ku dhamaday mise Hanad qaladkii miyuu ku sii dhagnaa mise wuu ka soo noqday misna rali galiyay Sabiriin.

Sabiriin iyada oo awood shaqsiyadeed mu jineyso ayee ku soo noqotay halkii uu walalkeed fadhiyay waxa ayna mudo ka dib ku soo noqdeen xaafadooda.

Markii ay xaafada ku soo noqotay Sabiriin maxey sameysay miyee wacday oo la xiriirtay Hanad mise sidii ayee uga aamustay.

Habenkii ayee Sabiriin bilowday in ay la xiriirto Hanad markii uu talefanka ka qabtay ayee bilowday in fahansiiso wixii manta dhacay iyo qaladka uu u fahmay in

ay isfansiiyaan oo ay xaliso s,i ay u sii wataan saacado badan ka dib wey ku guleysatay balse shuruud waxey ugu dhigtay inuu raali galiyo walaalkeed hadalada qaldan oo aad kula hadashay walalkee hadaa doneysi in uu xirirkeena sii wataan.

Hanad wuu aqbalay wuna rali galiyay walalkeed.

Labo isbuuc ka dib ayaa waxaa dhacday arin layaab leh oo soo wajahday Sabiriin kadib isku diyaarinteeda ku biirista Jaamacada.

Ka dib marki ay ka soo baxday gurigeed qorshaheedana ahaa in ay iska soo soo diiwaan galiso mid ka mid ah

Jaamacadaha ku yaal magaalada, soo noqodkeeda waxey gashay shil kaas oo geystay gaari wadada meel qaldan ka soo galay oo si lama filaan ah ugu dhacay ka dibna ay sawabtay in si deg deg ah loola cararo Isbitaal.

Ka dib Sabiriin markii la geyay isbitaalka ayaa xaladeeda adgatay markii ay gashay koomo una bahantahay qaliin xaga dhabarka ah kaas oo ay jugta ka soo gartay waiba si deg deg ah.

Markiiba waxa isku imaday dhaman reerkeda inta ay ku jirtay xaalada deg dega (EMERGENCY) waxa ayna bilabeyn in ay u duceyaan qalinkana aqbalaana.

Hanad markii arinta loo shegay wax ahmiyad ah masiinin danahiisa ayuu sii watay halka ay Sabiriin ku jirtay xaalad u dhaxeyso nolol iyo geeri.

Dadaal badan ka dib dhaqaatiirtii ayaa ku guleystay qaliinka ayna bad badiyaan xaladeeda.

Markii ay suux saneed saacado badan wey soo naaxday waxa ayna argatay iyada oo joogto meel ay dad dhar cad cad xeranyihiin iyo lyada oo dhar kale wadato.

Markiiba waxa ay bilowdo in ay kalkaaliyaasha la hadashay intaas ka dib walidiinteeda ayaa loo fasax oo waxaa loo soo wareejiyay qeybta bukaan jiifka.

Markiiba waxa ay bilowday maxaa igu dhacay halkaana sidee ku imaday.

Aaabeeheed ayaa u shegay in ay shil gashay ka dibna ay sidaas ku imatay.

Intii ay hareeraha fiirisay ayee weysay furuhii qalbikeeda oo ay ka fileysay in uu xaaladan garab taagnaado.

Balse arinta yaabka leh ayaa aheyd markii ay dhaqaatirta waalidkeeda u sheegeyn in aysan mudo istaageynin ayana saar naan doonto ***gaariga curyaaminta (WHEEL CHAIR)*** *oo ay mudo saarnaan donto balse hadey dadaal badan sameyso ay mudo gaban ku soo gaban doonto.*

Sabiriin arintii markii loo shegay oo xafada le kenay ayee tiri " Alxamdulilaah

hadii aan waligee sarnaan doonin balse sida ugu wacan ayaa ugu dadaalaa cafimaadkeeka wana iska daxadari donaa in sha Allah.

Markii ay mudo isbuuc ah ay hor istaag iyo wax talefan ah oo ay ka weysay Hanad ayee malintii danbe walasheed ka codsatay in ay u wacdo Hanad taleefankiisa balse nasiib daro wuu dansanaa.

Saacad ka dib ayee tiri mar kale wac waxaa laga yabaa in uu markaan daran yahay nasiib wanag wuu dhacay wuuna ka qabtay waxaana dhexmartay sheekadaan:

Sabiriin " Asalaamu caleykum sidee tahay "

Hanad "Alxamdulilaah adi sidee tahay"

Sabiriin "Masha Allah, maxaa kugu dhacay soo ma ogidoo inaa xalad adag galay oo mudo isbitaal ku jiray xitaa ima soo booqan."

Hanad "wan maqlay balse waxaa ahaa mashquul ay hada xafada maa jogtaa mise isbitaalka."

Sabiriin "Hada xaafada ayaa jogaa."

Hanad "Cawada ayaa kuu imanaa"

Sabiriin "Wan ku sugaa IN SHA ALLAH".

Hanad habenkii ayuu imaday xafada si wanagsana waa loo soo dhaweya, markii uu in mudo ah la jogay uuna la yabay iyada oo ku fadhiso gaariga curyaamiinta

inta uu melaha firiyay ayuu xogaa ka dib ku dhahay mar kala kuu imaana.

Hanad maarkii uu xafadiisa tagay ayaa waxa uu bilaabay in ka fikirio xaalada adag ay gashay Sabiriin.

Fikir badan ka dib waxa uu go'aan ku garay in uu soo afjaro saaxibstinimadii iyo Jaceylkii Saabiriin mudana saddexda sano ahaa iska oo ka foganayo xaaladeeda ay ku jirto oo ay isla jaan qadi karin noloshiisa.

Laba malin kadib markii ay wax hadal ah ka weysay ayee habenkii danbe wacaday.

Maxey Saabiriin kala kulantay Hanad.

Markii ay xaaldaha liska wereysatay ka dib ayaa Hanad u yiri hadal aysan marna

ka fileynin in uu ku dhahaayo balse wax walbo binu adamka waa laga fishaa.

Hanad ayaa ku yiri Saabiriin hadalkaan kaas oo sameyn ku yeshay in badan Hadaa kuu sheego mooqifkeyga ku adan dhankaaga ani agteeda wax kuma yaliin waayo adi iyo ani islama jaan qadi karno waayo adi waxaa noqotay qof fadhiid ah oo aan istaagi Karin ***ana waxaa Jeclaa qof dhameystiraan oo ila jaana qadi karo*** *balse adi hada ma tihid qofkaas ay awoodin socod ana waan awoodaa balse ani agteeda mar hore ayaa ka dhimatay ana waxa rabaa qof meeshaa rabo ila adi karo ay iska kee ilow qalbikagana ka iga saraaa by.*

Sabiriin ayaa markiiba weydiisay hal suaal oo kaliya waxa ayna ku tiri ***“Hada go’ankaaga waa ku qanacsantahaa filaa****”*

Hanad “Haa”

Sidaas ayee isku macsalaameyeen kuna kala tageyn balse Saabiriin waxa ay aheyd gabar ad adag oo isku kalsoon lehna mooqif iyo awood ay ku fuliso waxa ayna go’ansatay in ay tusiso waxa ay tahay iyo awoodeeda in kastoo Hanad jaceylka uu qalad ka galay.

Mudo lixbilood ah ka dib dadaal badan ay sameysay iyo adgeysi badan waxa ay ku guleysatay in ay dib ugu istagto cagaheeda ayna waxa barashadeeda sii

wadato balse Hanad waxaa ka soo baxday nabsiga uu ka galay Saabiriin iyo qaladka uu ka galay Jaceylka waxa uu noqday mid daremay nabsiga uu ka galay iska oo saag saag noqday gabar walbana uu is dhaho xiriir la samey waxa ku oranee ***"waan ka xumahay waan heystaa farxad igu filan".****Balse arinra murugada ku bertay ayee aheyd markuu argay Saabriin oo lugaheeda ku socoto waliba jaamacad ka soo baxday iska oo gaari homey darawalka ah.*

Sabiriin hada wey ku faraxsantahay nolosheeda waxa ayna heshay mid kaloo ka wanagsan oo dabiibay dhamaan

waqtiyadii xumaa ay soo martay ugna badalay farxad iyo reyn reyn.

Halka Hanad uu waxbarashadisii lumiyay ana haysan wax jaceyl iyo farxad ah.

Mar walbo ahoo mid ku faraxsan kuna qanacsan xalad walba uu ku sugan yahay kuna kalsoonoo awoodada nafsad ahaaneed amina waqtika iyo waayaha in ay macaan iyo qaraar yihiin.

DHAMAAD

WIXII TALO IYO SU'AAL AH AH NUMBERKAAN IGU SOO DIR

What's app/ Imo: 252616725007 ama Email faysalmoha207gmail.com